# Xeerka gargaarka iyo adeegga dadka naafada ah qaarkood (LSS)

## Waa maxay LSS?

LSS waxa weeye xeerka gargaarka iyo adeegga dadka naafada ah qaarkood *[Lagen om stöd och service till vissa funktionshindrade]* (LSS) oo ah xeer dhawra xuquuqda dadka qaba naafada culus oo joogta ah si loogu kafaala qaado hab-nololeed wanaagsan iyo in laga gargaaro waxyaabaha ay nololmaalmeedka ugu baahan yihiin iyo inay saamayn ku yeeshaan gargaarka iyo adeegga la siinayo.
Codsiga gargaarka iyo adeegga qofka xeerkaani saameeyo waxaa kolka hore lagu go'aaminayaa sida waafaqsan xeerkaan haddii ay hawlahaasi yihiin kuwa hawlaha xeerkaani khuseeyo. Ujeeddada laga leeyahayna wax weeye in qofka shakhsiga ah loo daneeyo. Gargaarka iyo adeegga xeerku dhigayona waxa la bixiyaa oo qura kolka la soo codsado.

## Yaa xaq u leh gargaarka iyo adeegga ku qoran xeerka LSS?

Haddaba, si xaq loogu yeesho gargaarka iyo adeegga naafada, waxaa la iska dalbayaa in qofku ka mid yahay dadka xeerkaani khuseeyo. Waana in qofkaasi yahay mid u baahan in laga gargaaro nololmaalmeedkiisa/nololmaalmeedkeeda iyo in aysan jirin habka oo baahidaas lagu haqabtiri karo.

Xeerku wuxuu khuseeyaa

1. dadka naafada ku dhashay ama waqti hore u naafoobay iyo dadka maankooda wax u dhaman yihiin iyo wixii la mid ah.

2. dadka garaadkooda dhaawac weyn oo joogta ahi kaga dhacay kadib markii iyaga oo weyn maskaxda dhaawac ka soo garay ama cudur wax u dhimay.

3. dadka qaba naafo xagga maanka iyo jirka ah oo aan ku iman da', balse ay ku adag tahay inay qabsadaan hawlaha nololmaalmeedkooda oo aad ugu baahan gargaar iyo adeeg.

## Waxaa hoos ku qoran tio qodob oo xuquuq iyo hawlo gargaar oo dadka xeerkani khuseeyo loogu talagalay:

**1.Talasiin iyo gargaaro kaloo gaar ah** *[Rådgivning och annat personligt stöd]*
Qofka xeerkani khuseeyaa wuxuu xaq u leeyahay gargaar ay siiyaan dad xirfad u leh oo aqoon gaar ah u leh la noolaanshaha dadka naafada ah. Waxaa tusaale ahaan gargaarkaas laga heli karaa hawlwadeenka talasiinta bulshada [*kurator*], aqoonyahanka cilmi-nafsiga, aqoonyahanka dhaqancelinta jirka, hawlwadeenka talasiinta dugsiyada barbaarinta, aqqonyahanka horumarinta hadalka [*logoped*], aqoonyahanka dhaqancelinta shaqaalaha iyo aqoonyahanka nuxurka iyo nafaqada cuntooyinka.

Gargaarka iyo talasiintu waa in ay noqdaan hawlo dhammaystir oo aysan noqon kuwo beddela hawlaha ay ka mid yihiin tababarka naafada, dhaqancelinta bukaanka iyo naafada iyo gargaarka bulshada.

**2. Xannaanada gaarka ah** *[Personlig assistans]*

Dadka qaba naafo culus oo aan weli buuxsan 65 sano jir waxay xaq u leeyihiin in loo qabto qof ama dhawr qof oo siiya xannaano gaar ah.

Haddaba si xaq loogu yeesho xannaano gaar ah waa in ay jirtaa baahi uu qofku u qabo isnadiifinta, cuntada lebiska iyo dhar iska bixinta, la xiriirka dadka kale ama baahi nooc kale noqon karta oo ku salaysan aqoon xeeldheer oo qofka naafada ah loo leeyahay.

Waxaa gargaarkaas hawlgeliya maamulka degmada oo ama xannaaneeye qabta ama kaalmo lacageed bixiya oo uu qofka naafada ahi uu iskii ugu qabsado qof kale oo hawsha u fuliya.

Maamulka degmadu wuxuu mas'uul ka yahay kharashka xannaanadu ka yar yahay 20 saac toddobaadkii. Haddiise baahida xannaanadu ka badan tahay 20 saac toddobaadkii, wuxuu qofku xaq u leeyahay in laga kaalmeeyo kharashka xannaanada. Xaq u yeelashada kaalmada kharashka xannaanadu wuxuu ku qoran yahay xeer lagu magacaabo Xeerka kaalmada kharashka xannaanada *[Lagen om assistansersättning]* (LASS).
Waxaana bixinta kaalmada kharashka xannaanada go'aan ka gaaraya Xafiiska Caymiska Dadweynaha. Go'aankaasina wuxuu maamulka degmada u xilsaarayaa inuu bixiyo kharashka ku baxa 20ka saac oo ugu horreeya.

Dadka qaba naafada culus oo da'doodu gaartay 65 sano waa inay kaalmada kharashka xannaanada horay ugu qaadan jireen intii aysan buuxsan 65 sano ama ay codsi u soo gudbiyeen intaysan buuxsan 65 sano. Xannaanada gaarka ah lama siinayo dadka da'doodu ka weyn tahay 65 sano.

**3. Hawlaha u wehelyeelka** *[Ledsagarservice]*
Hawlaha u wehelyeelka waxaa xaq u yeelanaya qofka aan helin xannaano gaar ah. Hawlaha u wehelyeelka waxaa ka mid noqon kara adeeg gaar ah oo lagu saleeyey baahida qofka si qofkaas loogu fududeeyo ka qaybqaadashada hawlaha bulshada.

**4. Xiriirye gaar ah** *[Kontaktperson]*
Waxaa loo baahnaan karaa gargaarka qof xiriir sameeya si loo yareeyo in qofku ka go'doomo bulshada oo looga taakuleeyo ka qaybqaadashada hawlaha bulshada oo weliba qofka naafada ah looga taliyo arrimaha nololmaalmeedka. Xiriiriyaha gaarka ahi wuxuu qofka u fududeynayaa sidii uu ugu noolaan lahaa nolol madaxbannaan. Gargaarkaas waxaa kolkol bixiya qoys loo yaqaan qoyska taageerada.

**5. Ka nasinta hawlaha guriga** *[Avlösarservice i hemmet]*
Hawlaha ka nasinta waxaa loo heli karaa sidii adeeg joogta ah ama adeeg la isa siiyo kolka ay dhacaan waxyaalo aan la filanayn.

**6. Joogitaanka muddo gaaban meel guriga ka baxsan** *[Korttidsvistelse utanför det egna hemmet]*
Joogitaanka muddo gaaban meel guriga ka baxsan waxaa looga gol leeyahay qofka la siiyo meel uu ku nasto oo hawageddis ka helo, isla markaasna qaraabada culeyska laga fududeeyo. Joogitaanka muddo gaaban meel guriga ka baxsan wuxuu noqon karaa hoy waqti gaaban, ama in qoys la la joogo ama xero nasasho.

**7. Ilaalinta carruurta dugsiyada oo da'doodu ka weyn tahay 12 sano** *[Korttidstillsyn för skolungdom över 12 år]*
Carruurta dugsiyada oo da'doodu ka weyn tahay 12 sano waxaa la siiyaa ilaalin gaar ah waqtiga dugsiga joogaan ama waqtiga ay fasaxa yihiin.

**8. Degganaanta guriga qoys kale ama hoy kale oo lagu hayo carruurta iyo dhallinyarada** *[Boende i familjehem eller i bostad med särskild service för barn och ungdom]*
Carruurta iyo dhallinyarada aan la noolaan karin waalidkood waxay xaq u leeyihiin in ay la noolaadaan qoys kale ama ku noolaan guriga oo lagu xannaaneeyo. Taasina waa mid lagu kalmeynayo carruurta iyo dhallinyarada waalidkood la noolaan kara waqti gaaban iyo kuwo aan la noolaan karin.

**9. Degganaanta hoy lagu hayo dadka waaweyn oo adeeg gaar ah lagu siiyo** *[Boende med särskild service för vuxna eller annan särskilt anpassad bostad]*
Degganaantaasi waxay noqon kartaa siyaabo badan, sida hoy dad badani *[gruppbostad]* wada deggan yihiin ama guryo gaara ee naafada *[servicebostad]*. Qofku wuxuu xaq u leeyahay in degmadu u diyaariso hoy ku habboon.

**10. Hawlo maalin walba** *[Daglig verksamhet]*
Dadka gaaray da' ay ku shaqayn karaan oo aan shaqo haysan ama aan waxbaran, waxay xaq u leeyihiin in la siiyo dhaqdhaqaaqyo maalmeed haddii ka tirsan yihiin dadka ku qoran qodobka 1 ama 2 sida xeerka LSS caddaynayo.

# Kharash

Hawlahaas qofka la siiyaa waa lacag la'aan badanaaba in kastoo ay jiraan marar lacag la iska qaado.

# Qorshe qof oo khaas ah *[Individuell plan]*

Qofka loo oggolaado hawlahaan oo kale sida xeerku qabo, wuxuu codsan karaa in loo sameeyo qorshe khaas ah oo baaritaan iyo dabagal lagu sameeyo. Qorshahaa diyaarintiisana waa in uu qofka gargaarka la siinayaa ka qaybgalaa.

Kolka qofka naafada ah la siinayo hawlo gargaar wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado in loo sameeyo qorshe uu qabanqaabintiisa ka qaybqaato.

Qofkuna waxaa fursad loo siinayaa inuu saamayn ku yeesho waxa qoshuhu ka kooban yahay, cidda ka qaybqaadanaysa iyo inuu soo gudbiyo waxa uu jecelyahay ama u baahan yahay. Qorshaha diyaarintiisana waa in la la kaashadaa dhammaan dadka ay khuseyso.

Qorshuhu wuxuu ka kooban yahay:

- In si gaaban loo qeexo xaaladda qoyska, aayaha qofka sida goorta uu dugsiga bilaabayo iwm.
- Hawlaha hadda la siinayo.
- Hawlaha loo baahan yahay ama loo baahnaan doono.
- Hawlaha qoysku codsado.
- Waxa dadka ay khuseyso (oo qoysku ka mid yahay) ay qabanayaan iyo goorta ay qabanayaan.
- Muxuu qoysku u baahan yahay? (Yaan la illaawin walaalaha!)
- Sidee taageero ku heli karnaa?

Waxa qorshaha ku qoran micnahoodu ma aha in la isu oggolaan karo hawlo gargaar. Waxaa dabagal lagu samaynayaa qorshaha, badanaaba sannad walba.

## Arjiga codsiga

Waxaa degmo walba jooga gacanhaye xil ka saaran yahay fulinta xeerka LSS. Waa in la soo gudbiyaa arjiga oo qoraal ah, in kastoo gacanhayaha afka looga sheegan karo kolka la la kulmayo. Qofka codsiga soo gudbinayaana waxa weeye qofka naafada ah.

## Warbixin dheeraad ah

Xeerka (1993:387) gargaarka iyo adeegga naafada qaarkood *[Lag (1993:387) om stöd och service till vissa funktionshindrade]*
Codsiga dowladda (1992/93:159) oo ku saabsan gargaarka iyo adeegga naafada qaarkood
*[Proposition (1992/93:159) om stöd och service till vissa funktionshindrade]*